TALLAALKA CUDURKA POLIO

WAXA AAD U BAAHAN TAHAY INAAD OGAATID

1 Waa maxay polio?

Polio waa cudur ka imaado fyrus. Wuxuu galaa cunug (ama qof weeyn) jirkiisa asagoo dhex marayo afka.Mararka qaarkood ma keeno halis dhab ah. Laakiin mararka qaarkood wuxuu keenaa *qallal* (aadan nuuxin karin gacanta ama lugta). Wuu dili karaa dadka uu ku dhaco, caadi ahaan asagoo qallal ku rida murqaha caawina neefsashada.

Cudurka polio aad buu caadi uga ahaan jiray Wadanka Mareeykanka. Wuuxuu ku riday qallal uuna dilay kumaan kun ee dad sanad kasta inta aan loo helin tallaal.

2 Maxaa la isku tallaalaa?

Tallaalka polio aan dhaq-dhaqaaq laheeyn (IPV) wuu ka hortagi karaa polio?

Taariikhda: 1916 cudurkii safar-marka polio ee Wadanka Mareeykanka wuxuu dilay 6,000 qof oo qallalna ku riday 27,000 kale. Waqtigii ka horeeyey 1950 waxaa jiray ilaa 20,000 qaddiyad ee polio sanad kasta.
Tallalidda polio wuxuu bilaawday 1955. Markii la gaaray 1960 tirada qaddiyadaha hoos ayuu u dhacay ilaa 3,000, markii la gaaray 1979 waxaa jiray ilaa 10. Guusha tallaalka polio ee wadanka Mareeykanka iyo wadamada kale waxeey dhalisay in aduunka oo dhan isku dayo inuu baabi'iyo polio.

Maanta: Polio aan rabbaayad aheeyn lagama soo sheegin Wadanka Mareeykanka 20 sano ka badan. Laakiin cudurka waa caadi ilaa hadda qeeybo ka mid ah aduunka. Waxeey qaadan kartaa hal qaddiyad ee polio ee wadan kale inuu cudurka dib u soo noqo hadii uuna tallaalka na difaaceeyn. Hadii dadaalka baabi'inta cudurka ee wadamada kale lagu guuleeysto, maalin maalmaha ka mid ah uma baahnaaneeyno tallaalka polio. Ilaa waqtigaas laga gaarayo, waa inaan wadnaa inaan caruurteena tallaalno.

3 Yaa la siinayaa tallaalka polio iyo goorma?

Tallaalka IPV, lagaaga duro lugta ama gacanta, ayadoo ku xirantahy da'da, tallaalka polio waxaa laguulaa siin karaa isla markaas tallaallo kale.

Caruurta
Dadka badidood waa ineey qaataan tallaalka polio markey caruur yihiin. Caruurta waxeey qaataan 4 qiyaas ee IPV, da'daan:

- ✔ Hal qiyaas 2 bilood
- ✔ Hal qiyaas 4 bilood
- ✔ Hal qiyaas 6-18 bilood
- ✔ Qiyaas badan 4-6 sano jir

Dadka waaweeyn
Dadka waaweeyn badidood uma baahna tallaalka polio sababtoo ah horay ayaa loo tallaalay caruurnimadooda. Laakiin seddex kooxood dadka waaweeyn ayaa halis ku jira, *waa ineey* tixgeliyaan tallaalka polio:

(1) dadka ku safrayo wadamada uu polio caadi u yahay,
(2) shaqaalaha sheeybaarada oo laga yaabo ineey xaleeyaan fyruska polio, iyo
(3) shaqaalaha daryeelka caafimaadka oo xanaaneeynayo bukaan-socodka qabi karo polio

Dadka waweeyn ee ka mid ah seddexdaan koox oo **aan weligood laga tallaalin polio**
waa ineey qaataan seddex qiyaas ee IPV:

- ✔ Qiyaasta koowaad waqti kasta,
- ✔ Qiyaasta labaad 1 ilaa 2 bil ka dib,
- ✔ Qiyaasta seddexaad 6 ilaa 12 bilood ka dib qiyaasta labaad.

Dadka waaweeyn ee ka mid ah seddexdaan koox ee **qaatay 1 ama 2 qiyaas** ee tallaalka polio waqti hore waa ineey qaataan inta u dhiman 1 ama 2 qiyaas. Macna ma laha inta waqti ka soo wareegtay qiyaasti horeeysay.

Dadka waaweeyn ee ka mid ah sedexdaan koox ee **qaatay 3 qiyaas ama ka badan** ee tallaalka polio (ama IPV ama OPV) waqti hore, waxeey heli karaan qiyaas badan ee IPV.

Tallaalka Polio ee Afka laga Qaato: La iskuguma taliyo

Waxaa jiro laba nooc ee tallaalka polio: **IPV**, oo ah tallaalka la iskugu taliyo Wadanka Mareeykanka maanta, iyo mid nool, talaalka afka ee polio (**OPV**), oo ah goojo la laqayo.

Ilaa waqti dhow OPV waa lagula talin jiray caruurta badidood Wadanka Mareeykanka. OPV wuxuu nagu caawinay inaan ka saarno polio wadanka, welina waaxaa laga istacmaalaa qeeyba badan ee aduunka.

Labada tallaalba weey ka hortagaan polio, laakiin OPV wuxuu ku fiican yahay inuu celiyo ku faafidda cudurka dad kale. Laakiin, dad tira yar (ilaa hal qof 2.4 milyankiiba), OPV run ahaantii waa u sabab polio. Ayadoo halista qaadidda polio ee Wadanka Mareeykanka eey aad u yartahay, haddana aad beey u yartahay, aqoonyahanada waxeey aaminsan yihiin istacmaalidda tallaalka polio ee afka halista qaadashadiisa faaii'do ma laha, markii laga saaro xaaladaha qaarkood uu takhtarkaada kuu qoro. Tallaalka polio (IPV) ma keeno polio. **Hadii cunugaada uu qaadanayo OPV, weeydii nuqul OPV Bayaanka Dheeraadka Akhbaarta Tallaalka.**

Weeydii bixiyaha caafimaadkaaga akhbaar badan.

4 Dadka qaarkiis ma aha ineey qaataan IPV ama waa ineey sugaan.

Dadkaan ma aha ineey qaataan IPV:

- Qof kasta oo eey ku dhacday xasaasiyad loo dhiman karo iyo ficil celin antibiootigaan **neomycin, streptomycin** ama **polymyxin B** ma aha inuu qaato tallaalka polio.

- Qof kasta ee qabo ficil xasaasiyad xun ee durmada polio ma aha inuu qaato mid kale.

Dadkaan waa ineey sugaan:

- Qof kasta ee si meel dhexaad ah ama si xun u xanuunsan waqtiga jadwalka durmada waa inuu caadi ahaan sugaa ilaa uu ka bogsanayo intuuna qaadan tallaalka polio. Dadka uu hayo xanuun yar, sida hargab, ***waa*** la tallaali karaa.

Weeydii bixiyaha xanaanada caafimaadkaada akhbaar badan.

5 Waa maxay halista IPV?

Dadka qarkiis ee qaato IPV meesha laga duray ayaa xanuunto. Tallaalka maanta la istacmaalo laguma yaqaano wax dhibaato xun uu keeno, dadka badidiisa wax dhibaata ah ma qabaan.

Laakiin, tallaalka, sida daawo kasta, wuxuu keeni karaa dhibaato xun, sida ficil celin xasaasiyad xun. *Halista durmada tallaalka polio inuu kuu keeno dhibaato dhab ah, ama dhimasho, aad beey u yartahay.*

6 Maxaa dhacayo haduu fal dhab ah jiro?

Maxaan fiiriyaa?
Fiiri xaalad aan caadi aheeyn, sida ficil celin xasaasiyad dhab ah, qandho sare, ama dabeecad aan caadi aheeyn.

Haduu ficil celin xasaasiyad dhab ah dhaco, wuxuu dhacayaa dhoowr daqiiqo ama dhoowr saacado markii lagu duro ka bacdi. Calaamadaha xasaasiyad dhab ah waxaa ka mid ah dhibaato neefsashada, laciifnimo, xabeeb ama neeftuurid, wadnahoo si deg-deg ah u garaaco, xiiq, wareer, midabka oo badalma, ama barar dhuunta.

Maxaan sameeyaa?
- Wac takhtarka, ama u gee qofka takhtar isla markaas.

- U sheeg takhtarkaaga wixi dhacay, taariikhda iyo waqtiga eey dhaceeyn, iyo waqtiga lagu tallaalay.

- Weeydii takhtarkaaga, kaaliyaha, ama waaxda caafimaadka ineey fylgareeyaan Tallaalka Dacdarrada Nidaamka Soo Tabinta Xaaladda (VAERS), ama wac VAERS numbarka teleefonka lacag la'aanta qudhaada **1-800-822-7967.**

Soo gudbinta ficilka ka imaanayo wuxuu caawinayaa dadka xirfadda u leh ineey ogaadaan dhibaatooyinka suurooba ee tallaalka.

7 Barnaamijka Qaranka ee Abaalmarinta Shilka Tallaalka.

Hadii xaalad nadiir dhacdo in uu cunugaada qabo fal dhab ah ee tallaalka, waxaa jiro barnaamij doowladeed ee kuugu caawinayo dhiibidda xanaanada dadka dhibaatada soo gaartay.

Faah-faahinta Barnaamijka Qaranka ee Abaalmarinta Shilka Tallaalka, (National Vaccine Injury Compensation Program) wac **1-800-338-2382** ama booqo barnaamijka cinwaankiisa kombiyuuterka ee http://www.hrsa.gov/osp/vicp/

8 Sideen ku bartaa in ka badan?

- Weeydii takhtarkaaga ama kaaliyaha. Waxeey ku siin karaan faah-faahinta wada dhan ee tallaalka ama kheeyraad kale ee akhbaareed.

- Wac waaxda caafimaadka, gudaha ama gobolka ee barnaamijka tallaalka.

- La xiriir Xarunta Xukumidda iyo Ka Hortagga Cudurada (CDC):
  - Call 1-800-232-4636 (1-800-CDC-INFO)
  - Booqo cinwaanka kombiyuuterka Barnaamijka Tallaalka Qaranka **http:/www.cdc.gov/nip**

U.S. DEPARTMENT OF HEALTH & HUMAN SERVICES
Centers for Disease Control and Prevention
National Immunization Program

Vaccine Information Statement
Polio (1/1/2000) - Somali 42 U.S.C. § 300aa-26

Translation provided by the Minnesota Department of Health